

Tallaalka KOFID-19 iyo Uurka

Tallaalka KOFID-19 waa mid badqab u leh qofka uurka leh.

- Xarunta xakamaynta iyo ka hortagga cudurada faafa ee CDC qeybteeda gobolka Minnesota ee qaabilsan caafimaadka bulshada waxay kula talinaysaa dhamaan dadka uurka leh, dhawaan uur qaaday, naaska nuujinaysa, iyo kuwa ka fakaraya inay uur qaadaan inay iska tallaalaan cudurka KOFID-19. Dadka uurka leh waxay khatar ugu suganyihiin inuu ku dhaco xanuun uu sababay KOFID-19 marka la bar-bardhigo dadka aan uurka laheyn.
- Haddii aad uur leedahay, is tallaal si aad isaga ilaalisid inuu kugu dhaco xanuun aad u daran uu sababay KOFID-19.
- Daraasadda waxay tilmaamaysaa in tallaalka KOFID-19 uu yahay mid badqab ah xilliga uu qofka uur leeyahay iyo sidoo kale xilliga naas nuujinta.
- Tallaalka KOFID-19 ma ilaaliyo kaliya qofka uurka leh ee sidoo kale wuxuu ilaalliyaa dhallaanka cusub ee dhasha.
 - Daraasadda waxay tilmaamaysaa dadka qaatay tallaalka KOFID-19 xilliga ay uurka leeyihiin wuxuu dhallaanka ay dhalaan ka yareeyaa khatar ah inay isbitaal u galaan cudurka KOFID-19 lixda bilood ee ugu horaysa noolasha ilmaha dhashay.
- Dadka uurka leh oo la xanuunsan KOFID-19 ilmaha calooshooda ku jira waxaa laga yaabaa inay khatar galaan.
 - Waxaa jirta khatar sii kordhaysa dhalmada ka hor, waxaana laga yaabaa in ay jirto khatar sii kordhaysa oo ah in dadka uurka leh ilmaha ay sidaan caloosha ku dhintaan kuwaa oo laga helay cudurka KOFID-19.
- La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad haddii aad su'aal qabtid.
- Durba ma laga tallaalay COVID-19? Hubi inaad heshay ugu yaraan hal dose oo ah tallaalka COVID-19 2024-2025 si aad ula socoto tallaaladaada COVID-19.

Tallaalka KOFID-19 waa mid badqab u leh dadka doonaya inay mar un ilmo dhalaan.

- Haddii aad doonaysid inaad hadda uur yeelatid ama mustaqbalka, waxaa lagula talinayaa inaad qaadatid tallaalka KOFID-19.
- Majiraan wax cadeen ah oo sheegaya in tallaalka KOFID-19 uu keeno dhibaatooyin xagga dhalmada ah.

Minnesota Department of Health
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5000
health.mn.gov

09/18/2024

La xariir health.communications@state.mn.us si aad u codsato xogta oo qaab kale ah (Somali).